# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36$^{aad}$ fadhiyadii 21$^{aad}$ iyo 22$^{aad}$**

**15 iyo 16/04/2018**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Mudanayaaasha ee Xeerka Tamarta Korontada

**Gudoomiye Baashe:-** Waxaynu maanta u balan saneyna dooda Xeerka Tamarta, iyada oo doodu inoo socotay, waxaan halkii ka sii bilaabaynaa dooda Xeerka waxaanan ku soo dhaweynayaa: -

**Md. Cabdi Maxamuud Jaamac (Gaagaale):-** Laba arrimood buu xeerkan muhiim ku yahay in laga badalo, tan koowaad waxa weeye saacad bay kuugu xidhayaan aad u dedejinaysa hadaad tidhaahdo saacad baan la imanayaa hagaagsan ma yeelayaan oo saacad xun bay doonayaan lacagta badan soo qoraysa oo waxay kugu soo qoraysaa $100, aniga maalin dhowayd $60 bay igu soo qortay, markaa waa inaynu Xeerka ku qorna in qofku isagu ikhtiyaar yeesho oo saacadda soo iibsan karo oo tan ay doonayaan ee fast ah aan laga yeelin.

Tan labaadna waxa weeye ratek oo qoloba waxbay qaadaan, qaarbaa lixdan kaa qaadaya, qaarna todobaatan, qaar kalena siddeetan, waa in loo sameeyaa rate go’an oo la yidhaahdo ratekaas ayay ku wada shaqaynayaan.

**Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo martidaba waa salaamayaa, Xeerkan waa xeer muhiima oo bulshada aad u taabanaya, waxaa jirtay korontadu way madax banaan jirtay ama Dawlada gacanta ku hayn jirtay iminka waxay noqotay wixiiba in hal meel isugu tageen oo shacabkii masaakiinta ahaa isu bahaysteen taasna waa laga fiican yahay, waxaan soo jeedin lahaa in tii dawladu sideedii ahaato waayo waxaa jira dad danyar ah oo isticmaali jirey laakiin markii ay midoobeen oo meel isugu tageen shacabkii masaakiinta ahaa meeshay ka baxeen, markaa sidii dawladu tan dawladda gacanta ugu haysay ha loogu soo celiyo.

Tan labaad, xeerkani wuxuu mamnuucaya in cid gaar ah loo xidho korontada sida ku qoran Qodobka 34aad ee Xeerkan, sida Dastuurka Qodobkiisa 11aad qeexayo iyadoo la ilaalinayo suuqa xorta ah iyo tartanka waxaana ku qoran shirkad kasta shida lixda Gobol laba ka mid ah waxaa loo tixgalinayaa hal shirkad iyadoo laga hortago inay kaga faa’idaysato awoodo dheeraad ah, waa sidaan sheegayo oo hadii wixiiba midoobaan way qaali garaynayaan oo awoodo dheeraada ayay yeelanayaan, sida

Xaaji Cabdi sheegayay waa in loo gooyaa rate go'an mar hadii ay dadkii u midoobeen, waxaana arrimahaas laga hortagi karaan in korontadii dawlada ee dawladu gacanta ku haysay lagu soo celiyo gacantii dawladda.

Runtii shirkadahan dabku faa'iido way leeyihiin laakiin in hal shirkad la yidhaahdo ha la siiyo dastuurka ka hortagay oo dadkii u damaanad qaaday waayo waxaa jira dad danyar ah, shirkad kastana oo korontada ka shaqaysa inay sidaas dastuurku u damaanad qaaday ahaato weeye, intaasaan ku soo gabagabaynayaaye.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** Gudoomiye Xeerka hadaa la ii dhiibay si guud uun baan u eegi doonaa, marka hore anigu waxaan qabaa maanta inta korontada ka shaqeysa waa private oo wuu madax banaan yahay oo waa macaash doon, marku macaash doon noqdo hadba wixii dadntoodu ku jirto uun bay eegayaan iyo faa'idadoodda waxa ku yaraanaysa danta gaarka ah ee ay mujtamacan u adeegayaan, markii hadii la madax baneeyay tusaale ahaan haya'dan laydhka bixiya waxaa fiican dawladuna inay qaybteeda ka muuqato ama wixii la odhan jiray 3d ee dawlada iyo dadka kale wada lahaan jireen way inay xeerka ka muuqataa oo ilaaba ilawa dawladu share ku yeelataa shirkadaha laydhka sidii barigii horeba ahayd si dawladu galangal ugu yeelato goynta sicirka iyo wixii soo kordha.

Waxa kale oo ereygan komishan oo inagu soo noqnoqda marka xeerarka Somaliland intooda badan la abuurayo, marka waxaan odhan lahaa ereyga Komishan macne kale ha loo raadiyo waayo tani waa wax private ah waana in hay'ad iyo wax kale laga dhigaa, intaas oo komishan oo madaxa iskula jira ayaa jiree.

Arrinta saacadaha ee xildhibaanku ka hadlayay waa in iyagana gaar loo tixgaliyaa, laba arrimood baa dhaca inay qofkii saacadii u diraan, hadana mid gaar ah ku xidhaan, markaa waxaa fiican ama inay iyagu saacadaha keenaan oo lagu khasbo ama dadka xoriyadooda tay leeyihiin ee ay la yimaadaan iyagoo suuqa halkay doonaan ka iibsanaya, markaa taasina Xeerka ka muuqato oo in iyagu keenaan iyo in qofku ikhtiyaar yeesho mid uun laga dhigo, inkastoo aana Xeerka aad u akhriyin anigu intaasaan ka odhanayaa, WSC.

**Md. Maxamud Jaamac Warfaa:-** Waxaynu ognahay in korontadu ama laydhku yahay waxa wadan walba horumarka u keena, inagu waynu naqaan waxa inoo shidan mishiino yar yar oo wadanka yaala, intaasoo shirkad oo baa wadanka ka shaqeeya, shirkad waliba intaasoo xadhig bay magaalooyinka dul mariyaan, waxa jira high station ay magaalo walba dulmariyaan oo ah waxa dadbka ugu wayn qaada waxay ku xidhaan bir halkay sabad hayn lahayd, waynuna ognahay oo korontadu khasaare badan bay keentaa waxaynu nidhaahnaa laydh baa qof ku dhagay iyo guri baa gubtay iyo khasaare noocaas oo badan, waxana sababa xadhkan dabka ee dulmaraya, markaa waxaan soo jeedinayaa in shirkadaha khasaba laga dhigo inay xadhkaha dusha maraya dhulka mariyaan.

Waxa kale oo jira foostada shidaalku markay ahayd $220 dadka waxaa la qaadi jirey 0.8 ilaa $1 maanta oo ay marayso foostadu $80 intii uun baa laga qaadaa, waxaynu nahay dadka aduunka ugu fiqiirsan ee uguna laydhka qaalisan, ilaa iminka wax xeer oo ka yaal ma jiro, waxa marka celcelis

ahaan loo eego tusaale Hargeysa oo kale bishii ilaa $2 Milyan dollar biillal ah ay suuqa ku soo daayaan, Gobolada kale ee wadanka markaan qiyaas ka soo qaadno  $2 Milyan dollar bay soo dalacaan markaa sanadkii waxay noqonaysaa $48 Milyan oo dollar oo laydh ah ayay dadka ka qaadaan wax Cashuur ah lagama qaaado, hadii sanadkii 5% cashuura laga qaadayo Dawladu waxay sanadkii heli lahayd $2.5 Milyan dollar cashuur ah, iminka laydhkii dadka waa lagu dhibaa, waana qaali, dawladuna wax kuma qabto, marka arrintaas Xeerku waa in lagu daro.

Waxa la yidhi Komishan baa loo samaynayaa, inta badan Xeerarka Komishanada halkan waa laga daraa, komishanadaas Miisaaniyad baa loo sameeyaa inta badan waxay hoos yimaadaan Wasaarad waa inaynu ka madax banaanaynaa, wasaaradaasi hadhwo iyadaa la yidhaahda Miisaaniyada ha u soo sameyso, ha u maamusho oo ha u soo dayso, hadhaw komishanadaasi ma socdaan, badanaa waxaynu maqalnaa Komishanada Madaxweynuhu Magacaabo uun baa shaqeeya oo hirgala, Markaa Komishankani si uu hirgalo oo u shaqeeyo waxaan soo jeedin lahaa Madaxweynuhu ha sameyo oo ha soo magacaabo, waayo intaas oo komishan oo aynu sameynay oo madax banaan oo aan shaqayn baa jira markaa waa khasaare iyada laftigeedu.

Dadka ka shaqeeya laydhku mishiin walba dab badan baa ka soo baxa wax injineero ah oo aqoon lihi ma joogaan meel walba inan yar baa loo diraa oo wuu iska xidhaa xadhigana haduu doono wuxuu ku xidhaa bac oo wuu iskaga tagaa, barito kale maalin waxaad arkaysaa iyadoo jararacdaas haysa oo gurigii ku soo socota oo gubaysa, marka waxa wanaagsan in shirkad walba lagu khasba nin injineera oo qualifying engineering ah inuu ka shaqeeyo. Intaas ayaan ku soo koobayaa, WSC.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** Shir-gudoonka, XIldhibaanada, shaqaalaha iyo Saxaafada waan salaamayaa ASC, Xildhibaana iga horeeyay Md. Maxamuud ayaa qodobadii iga horeeyay taabtay waan ku raacsanahay, waxaan ku kordhinayaa komishanka hay'addahan ha noqdaan biyo ama shidaal ama koronto ha noqdaan had iyo jeer waxay leeyihiin Consumer protection wax la yidhaahdo oo ka madax banaan iyaga shirkadaha iyo dawladaba iaygaana xuquuqda dadweynaha ilaaliya markaa taas ma lihin inagu.

Waxaan ku talinayaa komishankan in laga dhigo mid madax banaan oo xaafad walba ay iyagu sameystaan ilayn iyagaa yaqaan baahiyohooda iyo dhibaatada la kulmayse, iminka hadii laydhku ka xumaado oo inan yar lagu soo diro iyadoo shirkada masuuliyadooda ay tahay inay hagaajiyaan inankii adigii ama qofka uu u yimi buu kharashkii ka doonayaa, way dhici karta hadii uu garto inuu siiyo, laakiin waxay noqotay wax caado ah oo hadad bixinayso aan laydhkii laguu sameyn, **waxa kale oo jirta in laydhkii mudo kaa maqnaado waxna aan laga dhimin, marka qofka laydhkii mudo ka maqna waa in discount loo sameeyo oo intii uu ka maqnaa aan la charge-garayn.**

Waxaa jirta sidaas Xildhibaan Maxamuud sheegay waayar ama xadhku way badan yihiin xaafada aan ku jiro xaafad u dhow waxaan xasuusnahay dhowr iyo toban guri baa bishiiba gubta, waxa weeye jiingadahan ay ku jiraan, waayiradan ay keenayaana maaha kuwo tayo leh oo waa cheap laga keeno chine iyo meelahaas, qofka marka xaafadii uu ka gubo oo alaabtiisii gubato ama laga yaabo in cid wax kaga noqotay oo kaga dhimatay xaguu magdhow ka helayaa, waa qadar alle baa la odhanayaa,

**waa in sharci loo sameeyo oo qofkii shirkada adeegu ka xumaaday magdhowgiisa bixiso si dabadeedna ay ku keenaan alaab hagaagsan guryaha ku galiyaan. Waxaan ku soo koobayaa, WSC.**

**Marwo. Baar Siciid Faarax:-** ASC, horta marka hore waxaan waafaqsanahay soo jeedintii Gudidda marka laga reebo komishanka iyo muddda, anigu sidaas xaamud sheegayay waxaan soo **jeedinayaa in Komishanka laga dhigo komishan madax banaan oo aan la faro-galin, isla markaana kharashkooda shirkadaha laga qaado oo aanay noqon kuwo mushaharo dawlada ku leh**, tan labaadna Mudda waan ka soo horjeeda in shan sano laga dhigo si aanay u noqon kuwo meesha iska leh **waxaana soo jeedinayaa in 2 sano laga dhigo mudaddooda.**

Dhinaca qiimaha, qiimaha mushkiladiisu waxa weeye Gobol walba wuxuu lahaa shirkad koronto oo dawladu lahayd qaar way iska burbureen dagaaladii bay baabe'een oo maba soo noqon, intii kalena dad private ah baa la wareegay oo dad madax ah baa haysta, mushkiladuna waxa weeye dadkii masuuliyiinta ahaa ee mushaharka iyo wixii dalka ka soo baxa qaadanayay baa iyagii ka masuul ah dadkii qaali kaga dhigayo dabadeedna masaakiintii baa lagu tumanayaa, hadii nin gacasadihii bakhaar wayn leeyahay wuxuu sameystay kaaryooinihii iyo ninkii xamaalka ahaa iyo gaadhigii lagu qaadayay dee xagee dadkii masaakiinta aha qabanayaan, waxa weeye shirkadihii laydhka Dawlada waa in gacanta dawlada lagu soo celiyaa sababto ah dad masaakiin ah baa jira oo laydhkaba bilaash loo siin jiray oo nimankan shacabka ahi cidna bilaash ku siin maayaan, markaa **waxaan aad u adkaynayaa in Shirkadihii dib loogu soo celiyo gacanta dawlada.**

Arrinta birraha laydhka Roobkan roobkii ka horeeyay nin waalan baa ku dhintay waddada labaad agteeda, nin iska miskiin ah buu ahaa wuxuu taabtay bir laydh halkii buuna ku dhintay, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa birahan laydhka gabi ahaanba dusha maraya waa khatar, **markaa waa in la joojiyo oo dhulka la mariyo oo dhulka loo qodo isla markaana laydhkan xadhakaha badan in laga badalo oo dhulka la mariyo amar degdega ha laga soo saaro.**

Laydhka shirkado badan baa lahaa, shirkadihii way isutageen taasi dadkii danyarta ah dhibaato badan baa kaga timi, **markaa shirkadahan laydhka ha laga dhigo suuq xor ah oo shirkadahan faraha badan ee isu tagaya kuwo kale lagadaba abuuro si laydhku u jabo taasayna dadka masaakiinta ah dani ugu jirta, iminka qiimaha laydhka waxaa jira $1, $.8 baa jira, $.5 baa jira, xataa $.4 baa jira, markaa waa in qiimaha hoos loo dhigaa. Waad salaaman tihiin, WSC.**

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye:-** Shir-gudoonka, Mudanyaasha, Saxaafada dhamaan ASC, marka hore walaaladay waxay sheegeen in badan baan ku raacsnahay, dawladu waxa la yidhaahdo waxa ugu mihiimsan waa daryeelka umadeedda iyo shacabkeeda taasaana ugu horeysa, duruufo kasta oo jira oo iminka jira waxayu ku xidhan tahay inay xukuumadu doorkeeda ka qaadato, gaar ahaan biyaha, laydhka iyo cuntada, laakiin duruufaha jira ee sida xeerarka caalamiga in privation wax la yidhaahdo in la sameeyo ah oo waxyaabaha aanay xukuumadu awood u lahayn ay maamulaan haya'ddo madax banaani.

Maanta Xeerkan ina horyaal wuxuu ka turjamayaa sector muhiima oo xukuumada waajibkeeda ahayd inay gaadhsiiso umada ay ku wareejiso hay'addo gaar ah oo ganacsato gacanta u gasho,

ganacsadena faa'ido uun baa u dan ah, markaa xukuumadu haday weejisay oo ay tidhi waxa maamulaya shirkado gaar ah ha isu tagaan ama gaar ha noqdaan waxaa ku waajib inay ku ilaaliso danta umada oo aanay ku siidayn shirkadahaasina siday rabaan aanay u dhaqmin, Wasaarada waxaana loo sameeyay inay kadaba shaqeyso arrimahaas sidii ay u xakamayn lahayd sicir, tayada iyo arrimahaas oo dhan in la helo tamarta caafimaad qabta oo deegaankana wax yeelayn umadana aan wax yeelayn, motor piscine ana nafto ku shaqeynayana waa waxyaabaha laga gudbay, markaa xukuumadu waa inay ku dedaasho sidii tamarta deegaanka iyo caafimaadka umadaba u fiican la helo oo dawladu xilkeedii iyo waajibaadkeedii gudato.

Madaama Xeerkani ina horyaalo oo aynu leenahay aynu falanqeyno, Komishankan la sameynayo sida xildhibaanadu yidhaahdeen in laga dhigo mid madax banaan waan ku raacsanahay, laakiin wasaaradu waxay leedahay waajibaad inay ku khasabto inay sida danta umadu ku jirto u shaqeeyaan, Wasaarada iyo Komishanku wada shaqeeyaan sidii daryeelka umada loo heli lahaa. Waxaan raacsanahay soo jeedimaha Gudidda Deegaanka oo aan ugu mahadnaqayo dedaal bay sameeyeene, laakin waxaan isleehayay ku dar ama ku biiri waxyaabihii ay ka tageen.

**Qodobka 6aad** dib u eegsi iyo kaabis bay ku sameeyeen waxa iiga muuqata inay gudiddii ka dhigeen lix xubnood, **waxaan leeyahay waa in laga dhiga 7 xubnood si hal dheeri u yimaado**, waxaana ka dhiga xarafka B) shirkaduhu waxay leeyihiin hal xubin, xubnahaas shirkaduhu way badan yihiin anagoo gudidda dhaqaalaha ahna waanu la kulanay marka waxaan jeedinayaa in halkaas laga dhigo 2 xubnood Ururka shirkadha laydhka ha kala mataan haday doonaane, markaa sidaas ayay xubnuhu guud ahaan 7 xubnood u noqonayaan, labada xubnood ee Labada Gole (Guurtida iyo Wakiilada) ka kala soconaya shuruudihii lama raacin marka waxaan soo jeedinayaa in la yidhaahdo mid waliba ansixitiisa isaga meel marinaya waxaana ku qoran Golaha wakiilada kaligii baa ansixinaya shuruudna waa in looga dhigo inay yeeshaan aqoon iyo khibrad laydh ugu yaraan saddex sanadood ilayn in cid uun in la iska keneo maahee.

Waxaan ku darayaa laba Qodob oo muhiima, kuwaas oo ah Gudidda marka la dhiso yay masuuliyadoodu u noqonaysaa ma Wasiirka, waxaan leeyahay marka la soo ururiyo Xubnaha gudidda cidda meel marinaysa, markaa farqad KH ah baan ka dhigay ah "**marka la soo xulo dhamaan xubnahaas Gudidda waxaa ansixinaya Golaha Wakiilada"** qodob baan ka dhigay.

**Qodobka 12aad** ee Qaab-dhismeedka Gudidda wax badan baa ku jirta way ka soo shaqaysay Gudidda deegaanku laakin waxaan odhan lahaa waxaa ku filan in laga dhigo oo kaliya "**ka dib marka Golaha Wakiiladu ansixiyo Xubnaha Gudidda iyagaa iska dhex dooranaya Gudoomiyaha iyo ku-xigeen iyo xoghaye**" ma jirayo xoghaye waxaas oo dhan  markaa Qodobkaas 12aad wuxuu ka baxayaa.

Waxaan isleeyahay marka xubnaha sidaas loo xulo ee Golaha Wakiilada iyo Golaha guurtidu xubnohooda soo xulaan, Wakiiladuna ansixiyaan dhamaantood oo ay doortaan Gudoomiyahooda iyo ku-xigeenka wasaaraduna xilkeedii ahaa daryeelka umada u raadinta xuquuqdooda ku dabagasho madaama ay wixii ay qaban lahayd private ku wareejisay, intaas ban ku soo koobayaa, WSC.

**Md. C/laahi Xuseen Cige (Blacky):-** shir-gudoonka, xildhibaanada, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa marka hore, Mudane Gudoomiye anigu lifaaqa ay soo jeediyeen Gudiddu sidiisa ayaan la qabaa in loo qaato, waxa kale oo aan qabaa in laga saaro laba xubnood ee Baarlamaanka maadaama Baarlamaanku yihiin kuwii ansixinayay maaha inay board-ka mid noqdaan, marka waxaan soo jeedinayaa in laga saaro labadaas xubnood ee Baarlamaanka oo lagu daro halka baarlamaanka laga siiyay in Shirkadaha saddex xubnood laga dhigo.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa **Qodobka 4aad farqadiisa 2aad** ee u dhigan sidan **"Wasaaradu waxay tahay dhexdhexaadinta dhamaan muranada ka dhasha go'aamada ay soo saaraan Komishanku Nidaaminta Tamarta Somaliland, hadii dhinacyadu ku qanci waayaaan dhexdhexaadinta Wasaarada waxay rafcaan u qaadanayaan Maxkamada sare"** waxaan soo jeedin lahaa in laga saaro Wasaarada oo hadii dhinacyadaasi ku heshiin waayaan cadaaladda waxaynu u leenahay hay'ad sameysane loo daayo Maxkamada sare.

**Qodobka 4aad farqadiisa 11aad** oo ah **"Wasaaradu waxay ansixinaysaa xeer-hoosaadyada ay soo saaraan komishanku"** waxaan ku sii daray **"ee aan ka hor imanayn shuruucda dalka cid gaar ah aan u xidhayn hawlaha korontada".**

Sidoo kale Waxa kale oo aan soo jeedinayaa **Qodobka 31aad** ee ah **"Wasaaradu iyadoo la tashanaya Komishanka waxay awood u leedahay inay soo saarto Xeer-hoosaad si ay u fuliso qodobada Xeerkan"** Iyana waxaan ku daray sidoo kale "**oo aan ka hor imanayn shuruucda dalka cid gaar ah aan u xidhayn hawlaha korontada".** Inagoo og qaylada ka taagan laydhka, shirkadaha laydhkuna baryahan lahaayeen Xeerkan cid gaar ah ayaa loogu xidhayaa korontada waxaan soo jeedinayaa si aanay taasi u iman in dadka looga dhigo xor u noqdaan oo waxay wada leeyihiin noqdaan. Waan ka baxay.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** shir-gudoonka, iyo Mudanayaashuba waad salaamantihiin. Gudoomiye marka ugu horeysa xeerkan aynu gacanta ku hayno Wasaaradii shaqada ku lahayd may soo gudbin qaybtii ay ku lahaayeen, Gudiddu markii ay u gaysay umay soo jawaabin markaa Xeerkani wuu kala dhantaalan yahay hadaan talaaboyinkii sharciga ahaa ee iyaga ka imanayay aanay halka ku jirn, marka waxaan soo jeedinayaa Wasaaradu inay keento shuruudihii ama qodobadii lagu dhaqmayay oo lagu kala xakamaynayay laguna kala hagaagayay iyaga iyo shirkaduhu, iminka waxaynu haynaa waa shirkadihii kaliya, maanta hadii shirkaduhu cid ay masuul u yihiin oo shuruudihii looga baahna keentay ma jirto, marka waa in Wasaaradii Warqad loo qoraa oo la yidhaahdaa keena idinka awood u leh shuruudihii shirkadahaas lagu sameynayay iyo standardkii looga baahnaa inay qaadi karto.

Tan kale arrinkani waa mid saameynaya mujtamaca waa waxyaabaha xadaarada ka mid ah, maaha afartan waraaqod oo kaliye duruufo badan baa ku xidhan bahalkan, toban wadaad iyo toban ganacsade baa doonaya inay qaataan, waxaa ku qoran 20% buu ninkii qaadanayaa, maaha in la yidhaahdo sidaase waa in lawada dhigaa oo shareka nin walba oo muwaadin ahi uu ka qayb-galaa, sidaas ay tahay tobankaas wadaad ee ganacsadayaasha ayay u xidhan tahay waayo sida ku qoran

20% buu qofku lahaan karaa waana wixii laga qaylinayay, marka waxaan soo jeedinayaa in Saamiga la dhigo oo dadku uu ka qaybgalo loona siman yahay.

Tan kale ee aan ku soo darayaa waxa weeye dhul kulul baynu leenahay, dhulkii kululna marawaxada hadaad shidato ma kari karaysid laba maalmood wax ka badan in laydhku kuu shaqeeyo ama talaagad yar oo biyo lagu iibiyo ama aqal, markaa waa in umada la ilaaliyo oo aan lagu siidayn ganacsadaas dhiiga miiranaysaa cidii ilaalinaysaana ma jirto oo tii ilaalin lahayd waa Wasaaradaas, marka ama inagu aynu sharci ku soo saarno oo xakamayno ama Wasaaradii waa inay la wareegtaa masuuliyadii.

Waxyaabaha madhan ee gaabka ah waxa weeye wixii damage ah ee yimaada xagee loo raacayaa oo yaa ka masuul ah security measures baa jira kumana qorna sharcigan Wasaaradiina may soo gudbin, **markaa Xeerkan qabyooyin baa ku jira oo waxyaabo umada dhib u keenaya ayaa jira eh waa in inta Ad hoc Committee loo saaro aynu dib u fiirino Xeerka**, waayo takaaliifta umada dadkii ka ilaalinaysana waa Qodob Dastuuriya shirkado badan baa jira oo la yidhi cid baa iska leh, war wax cid iska leedahay ma jiraane umadu kawada dhexeeyaa tartanku.

Waxa ka maqan xeerkan waxyaabo badan oo ay ugu horeeyaan xuquuqda dadka iyo xuquuqda shirkadaha iyo doorka wasaaradu ku leedahay saddexdaasiba way ka dhiman yihiin Xeerka, waxaana kuu cadaynaya ninka masuuliyada laydhka qaadaya gidaarku markaba ku dhajinayaa saacadii hight voltage-ka ahayd, darbigii oo biyo ku soo de’een bay saacadii is qabsanayaan aduunka kale loox baa looga dhigaa, waayirkii buu aqalkii soo galinayaa oo jiingadii gubaya, waa waxyaabaha dhiman waana in beeb la galiyaa oo ay helaan shirkaduhu meesha ay galinayaan waxa ka yimaada iyo dadka, shirkadihii waxay odhanayaa anagu shaqo kuma lihin laydhkii banaanka ayay dhibto ka timi, marka in cidii u dhaxaynaysay la helaa, waxaan ku soo koobayaa umadda qofkii consumerka mushkiladaas taabanaysa cidii ilaalinaysay iyo xuquuqdii iyo shuruudihii iyo marjicii loo noqonayaa iyo cidii u dhaxaynaysay.

**Sidaa awgeed:-**

- Ad hoc committee ha loo saaro, sharciyaqaanona ha lala kaashado sidii saddexdaas qaybood xuquuqdo loo helo, dhulka kululna sixir ka duwan loogu heli lahaa.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Mudane Gudoomiye waad mahadsan tahay, xildhibaanada iyo shaqaaluhuna way salaaman yihiin, intaas ka dib, Xeerkan isaga ahi waa xeer aad u wanaagsan oo labadii af lagu qoray Afsomali iyo Ingriis, waa xeer gudidii ka soo shaqaysay, isagoo sidaas u wanaagsan intaana sheegin conculution-kagya waxaan Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaa inkasto Xeerku Korontada yahay, hadana waxaynu ognahay in korontadu qayb tamarta ka mid ah yahay isla markaana Wasaaradasi ay xukunto, hadaba marxaladan uu marayo wadankeenu inay dhiirigalino tamarta ha noqoto korontada mishiinada laga dhaliyo, tan cadceeda, biyaha, dabaysha iyo tan dhuxul dhagaxda waxaas oo tamar ah ilaa lixdaas aan soo sheegayna aynu dhiirigalino oo ku dhiirigalino (1) Xeerarka aynu sameynayno (2) ku dhiirigalino muwaadiniintu inay intaas oo tamar ah aad ugu faa’ideystaan waana wax horumar inoo keeni kara.

Sidaas darteed, lixdaas arrimood oo tammar ah inaynu dhiirigalino baan soo jeedinayaa xukuumada iyadoo laba qaybood loo eegayo qaybta public-ga loo yaqaan iyo qaybta private ee dadweynaha labadaba aynu dhiirigalino, waxa kale oo aan soo jeedinayaa mudane Gudoomiye marka xeerarka arrimahaas aynu ka hadlayno la ansixiyo in had iyo jee saddex qodob raacno, saddexdaasuna halkana kama maqna, kuwaas oo kala ah (1) faa'idadda loo samaynayo ee dalka u leedahay mabda'ahaan (2) dadka isticmaalaya xuquuqdooda sida xildhibaanadu xuseen afka qalaad lagu yidhaahdo consumer right, xuquuqdaas oo noqonaysa in afka wax laga siinayo sida uu isticmaalayo waa xuquuqdiisii, waana wax inaga maqan oo u baahan inaynu halkan ku kordhino, (3) waa in deegaanka waxaasi in aanay waxba yeelayn, oo la iswaydiiyaa maxay environment-ga yeelaysaa.

Sidaas darteed, markaan intaas xuso ay xildhibaanaduna aad ugu celceliyeen oo sax cidii ilaalin lahayd ma xukuumada, ma hay'ad gaar ah baa, ma inaga oo markaan inaga leeyahay sax bay xildhibaanadu yihiin laakiin cid inoo soo dacwootay maynu arag oo cabasho inoola timi, markaan intaas ku daro waxyaabihii laga soo shaqeeyay xeerkan.

Gaba-gabo:-

- Marka la eegno xeerkan oo wanaagsan lagana soo shaqeeyay mudona gacanta ku haynay, markaan eego Gudiddeenii sharafta badan ee dedaalka galiyay, markaan eegay dooda oo Xildhibaanadu qodob wax ku oola soo jeediyeen marka intaas la isku daro, waxaan soo jeedinayaa Xeerkan inaynu ansixino oo gudbino ha lagu shaqeeyo.

**Md. C/kariim Aw Cali Shabeel:-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaal waxaynu had iyo goor caado ka dhiganay xeerarka marka Golaha la inoo keeno iyadoo khaladaad badan ku jiro oo aan lagu daalin oo aynaan si fiican u tuujin in xildhibaanada qaarkood si fudud u yidhaahdaan ha la sii daayo, halkan Xeer baa la inoogu soo gudbiyay, xeerkaas markaan arkay soo jeedinta iyo qodobadiisaba anigu waxaan arkaa inaanu fawdada ama qaylada ka taagan qolyahan korontada maamula oo dadku aad uga qaylinayaan, xadhkaha magaalada dulmara marka eego qaabkay u sameysan yihiin, nabadgalyo xumada ka timaada, gubashada ay sababto oo aan wax compasation in dadka wax ku noqda loo celiyo oo magdhow ah oo kaga qoran Xeerkan ma jirto.

Waxa markhaati laga yahay lacagta ugu badan xataa yurub .7 unitkii maaha xataa London baanu ahayn Iyana xeerkan waxba kagama qorna, qodob kaga qoran cashuurtii macaashkii ay ka heleen laga qaadi lahaa kuma jirto, halka Gudi baa lagu soo qoray, gudiddu magac ma laha waa komishan baa la yidhi, waa komishan maxay ah, komishan baa ina wareeriyay oo komishanka la sameeyaa in cid loo sameeyay xidhiidh la yeesho weeye iyo dariiqo ay kuwada shaqeeyaan, lama yeesho wax contribution ah ama xidhiidha markhaati baad ka tihiin, anigu waan ka soo horjeedaa komishank midba meel laga soo qaaday, **waxaana soo jeedinayaa in Wakaaladda Xooga Korontada loo sameeyo oo Wasaarada ka madax banaan gacantii dawladana lagu soo celiyo, komsihankaasna meesha laga saaro *(xildhibaano badan baa taageeray).***

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa Mudane Gudoomiye Xeerkani waa xasaasi oo xataa 10 Qodob oo dhibaatadan jirta lagu xakameeyo haday noqoto haday qiimaha, noqoto, haday cashuur noqoto,

haday dhimashada iyo dhibta ka timaada noqoto, haday noqoto sida kootada loogu qabsaday wax laga hortagayaa kuma jirto xeerkan.

**Sidaa darteed:-**

- Waxaan ku soo koobayaa xeerkan wax badan baa ka dhiman waa in laga baaraan dego sidii xildhibaanadii hore soo jeediyeen oo aan lagu degdegin oo inta Gudi loo saaro ad hoc committee ah, sharci yaqaano iyo dad khabiiro ah loo qabto si fiican looga soo shaqeeyo ayaan koobayaa.

**Gudoomiyaha:-** Xildhibaanada hadhay barito ayaynu u dhiganaynaa doodoodda, fadhiguna wuu xidhan yahay oo waa inoo barito.

## Doodda Xeerka Tamarta Korontada Maalintii labaad

**Gudoomiye Baashe Maxamed Faarax,** Waxaynu maanta u balan saneyna dooda Xeerka Tamarta, iyada oo doodu inoo socotay, waxaan halkii ka sii bilaabaynaa dooda Xeerka waxaanan ku soo dhaweynayaa: -

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** Gudoomiyaha iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, inta aanan u galin dooda xeerka waxaan ka horaysiinayaa in yar, inta badan waxaad aragtaan xeerarka marka la inoo keeno xildhibaanada oo yidhaa haloo diro adhokcommittee ama khubaro haloo diro, anigu halkaa waxaan u arkaa wax inagu ceeba 82nin oo xeer loo keenay oo dib isaga riixay waxay inagu tahay foolxume e waa in aan akhrinaa, si aan waxna uga badelno waxna ugu darno.

Mida labaad markii aan xeerka aan akhriyay waxaad moodaa in uu u hiilinayo nimanka laydhka bixiya ama ay tahayba, waxaayo waxaan ka waayay wax badan oo kafka wax iibsadaha wax xaqiisa ilaalinaya xeerkan ina horyaala kuma aan arag, hadii aan tusaale u soo qaato laydhku dhibaato badan ayuu leeyahay, oo saacado khalada ayaa lagu soo xidhaa oo dadka lacago badan ku soo qora ama ku soo saara, installations-ka lagu xidhayana waayirada hadii ay noqdaan kuwo dusha mara iyo haday kuwa meheradaha, guryaha ama hadii ay noqoto kuwa gudaha marayaba waxaad arkaysaa in aanay ahayn kuwo heer calami aha’

Markaa waxaan leeyahay kaw waa in ay noqdaan international stander, waayo caalamku waxaa uu leeyahay standard taagen ayuu leeyahay , xitaa hadii aad eegto fiishadaha lagaliyo gidaaraga iyo haday tahay kuwa ku samaysanba dhamaantood waa wax raqiis ah oo aan micno badan lahay ama waa fake, hadii aad kiiniyadaa inagu dhaw fiishan aad ka iib sato 5 to 6 year ayay ku haynaysaa markaa waxaan leeyahay **qodobada 26aad, 29aad, 30aad** waxay wax ka sheegayaan qofka wax gaysta, halka hal qodob oo aan si fiican u qornayni uu sheegayo hadii qofka laydhku wax yeelo.

Markaa waxaan leeyahay waa in lagu daraa Qodob sheegay dhamaan agabka lagu isticmaalaa laydhku ay noqdaan stander caalamiya oo aduunka la jaan qaadaya ee aanay noqon wax yar oo caantayn ah oo dadka wax yeelaya.

Qodobka labaad waxaa weeyi distoorkeenu ma qorayaa baayar mushtarku waa xor, waxaan soo jeedinayaa in qof waliba laydhka Meesha uu doonayo in uu ka qaato oo lagu tartamo oo hadii kale waxaa Meesha ka ka baxaya ganacsigii xorta ahaa ***(Taageero ayuu helay ilaa 5 mudane)***

Gudoomiye waxaan ku darayaa komishanka waxaa laga dhigay very powerful, had iyo jeer hay’adna waa in ay jirtaa hay’ad kale oo isha ku hayasaa sida ay udhisan tahay dawladeenuba oo ilaalisaa, markaa waxaan leeyahay waa in komishanka lagu daraa xubi wasaarada arimaha Gudaha ka socota, sababta oo ah waxaa ku jira dab-damiskii, CID-dii iyo kuwii baadhayay kiiskuba waxay hoos imanayaan wasaarada arimaha Gudaha

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa Qodobka 29aad ninka dab bixiyaha ama liisanka haystaa, marka dab dhaco, gaariyi dhacdo ama khasaare dhaco waxaa ku taala in uu komishanka ku yeelanayo, halkaa waxaa is leeyahay khalad ayaa ku jira waayo waxaan isleeyahay waa caafimaadka, booliska iyo dab-damiska waayo marka uu wax dhaco Meesha ugu horaysa ee wax loo dirayaa waa meelahaa, markaa halka uu ka isticmaalay kalmada ah sida ugu dhakhsaha badan, waa in kalmadaa loo isticmalaa isla markiiba waa in uu ogaysiiyaa booliska, dab-damiska iyo komishanka waana qodobka 30aad. Waanad mahadsantiihiin.

**Md. Wali Axmed xaawa: -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa, waxaad moodaa in xeerka ay ka maqanyihiin waana xaga turjumaada oo qaybta soomaaliga ayna ku jirin waana qodobka 2aad. Waxaa kale oo aan intaa ku darayaa sida ay sheegayso shuruucda dalka iyo dastuurkuba in uu sharcigan cid wax u kootaynayo ayaad moodaa iyada oo ay ka soo hor jeedo dastuurkuna in cid wax loo kooteeyo.

Sidoo kale inta aan ka eeg eegay xeerkani waxaa uu inta badan xaqsiinayaa mulkiilada ee kuma jirto wax xaqa oo uu siinaya customers-ka. Sida ay xildhibaano badani ka dhawaajiyeen waxaa jirta in saacadaha aad soo iibsato ama aad la tagto xarumaha laydhka bixiya ay diidayaan oo tu ay rabaan iyagu kuu dirayaan in aad soo iibsato, taas oo aan u malaynayo in ay waxbadan qorayso in kasto oo aanan tijaabin, markaa waxaan soo jeedinayaa in dib loogu noqdo oo xeerka waxbadan laga soo badalo oo lagu daro xeerka wax customerska soo jiidanaya xuquuqdoodana ilaalinaya aadna waad u mahadsantihiin.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin: -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa ugu horay waxaan sideeda u taageerayaa Talada Gudiddu ay soo jeedisay marka laga reebo labada xubnood ee golaha wakiilada mooyaane, waa in aan ka dhignaa 2 xubnood oo shirkadaha Tamarta ah, hal xubin oo dawlada ah, xabad chamber of commerce ka ah, looyar madax banaan iyo xubin Dawlada hoose ah. Oo labadaa xubnood ee golaha wakiilada laga saaraa Meesha. Inta kale talada Gudidda waxaan u qaadanayaa sida ay u soo jeediyeen, waana muhiim in xeerka ka mid noqoto waayo waxay daawo u tahay talada gudidu muranada iyo tuhunada hada suuqa ku jira ee xeerkan dhaawaca weyn ku ah ee la leeyahay xeerkan cidbaa loo xidhayaa ah.

Hadii aan u soo noqdo xeerka qodobkiisa 3aad oo ah u jeedooyinka uu xeerku xambaarsanyahay, waa in aan mid si wanaagsan ugu cadayno oo aan nidhaa waa in ay shirkaduhu noqdaan kuwo ku tartama suuqa sida uu dastuurku uu sheegayo waana in qodobkaa lagu cadeeyaa ***(taageero 7mudane ah ayuu helay).***

**Qodobka 4aad farqadiisa 12aad** sabab loo sameeyaa may jirteen hadii ay wasarada dhex-dhexaadin ka galayso komishanka ayaa masuul ka ah wixii ka yimaada muran cida ku qanci weydaana waa in ay toos u tagtaa maxkamada, markaa waa in farqaadaa Meesha laga saaraa. ***(Taageero 6mudane ah ayuu helay)*** waana in sidaa lagu saxaa.

**Qodobka 4aad farqadiisa 4aad** Wasaaraddu waxa ay qorshaynaysaa islamarkaana horu-marinaysaa qaabdhismeedka ugu habboon ee lagu meelmarin karo Komishanka Nidaaminta Tamarta Somaliland. Wasaaraddu waxa ay qabanaysaa islamarkaana fulinaysaa awoodaha iyo waajibaadka Komishanka uu Xeerkani siiyay illaa iyo inta uu Madaxweynuhu ka soo magacaabaayo Guddida Komishanka ee ay Guddiduna xilka la wareegayaan.

Komishanka marka la dhiso waa in uu isagu qaab dhismeedkiisa samaystaa ee waa in aanay wasaarada u samayn, waayo waa in uu shaqadiisa isagu maamulaa waana in qodobkaa lagu saxaa sidaa***. (Taageero 3 mudane ah ayuu helay)***

**Qodobka 4aad farqadiisa 9aad** Wasaaraddu waxa ay abuuraysaa oo ay maamulaysaa Sanduuqa Ammaano Haynta ee Tamarta Somaliland.Sanduuqa waxaa looabuuray in lagu horu-mariyo laguna maal-geliyo Kaabayaasha dhaqaale ee Aagga tamarta iyo in lagu horu-mariyo Komishanka Nidaaminta Tamarta ee Somaliland. Maadaama oo uu jiro komishan sabab ay u haysaa ma jirto ee komishanka ayaa haynaya sanduuqa

**Qodobka 4aad farqadiisa 10aad: -** Wasaaraddu waxa ay hawl-fududaynaysaa islamarkaana dhiirri-gelinaysaa in dib-u-habayn lagu sameeyo qaab-dhismeedka iyo hawlgalka Shirkadaha qaybiya tamarta si loo helo tamar hufan oo jaban. Sabab ay u dhex gashaa iyada oo uu komishan jiro Meesha mataal ee shaqadaa waxaa iska leh komishanka, waxaad moodaa in laba arimoodba ay dhinac ka raranyihiin oo shaqada wasaaradu waxaad moodaa in ay barbar socokoto komishanka waana in wasaarada shaqadeedu ay oversight iyo policy ay noqotaa waana in shaqada oo dhan uu yeeshaa komishanku (***taagero 5 mudane ayuu helay qodobkani)***

**Qodobka 4aad farqadiisa 11aad:** Wasaaraddu waxa ay ansixinaysaa Xeer-hoosaadyada waafaqsan Xeerkan ee ay soo gudbiyaan Komishanku. Xeer-hoosaadka cida samaysanaysaa waa komishanka, kaliya waa in ay waafaqsayihiin xeerarka kale ee qaranka iyo distuurka qaranka Somaliland.

**Qodobka 4aad farqadiisa 13aad:** Maalgashiga shisheeye ee Aagga tamarta waxaa ansixinaaya Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta iyadoo la tix-gelinaayo shuruudaha maalgashiga ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Maalgashiga islamarkaana la tashi lala samaynaayo Komishanka Nidaaminta Tamarta ee Somaliland. Waxaad moodaa in xeerkan la sameeyay inaga oo aan lahayn wasaarada maalgashiga markaa waxaa la shaqaynaya wasaarada maal gashiga waxaana loo raacayaa shuruucda maal gashiga

**Qodobka 6aad farqadiisa 2aad xarafkiisa kh.** laba xubnood oo wakiil ka noqon doonta Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta. Halkan sida aan hore soo sheegay waa in hal xubin lagu saxaa.

**Qodobka 6aad farqadiisa 3aad: -** Marka uu Wasiirku codsado waa in xubnaha kor ku xusan uu Urur waliba u soo xulo laba xubnood booskiiba, waana in loo soo gudbiyo Wasiirka muddo lixdan (60) maalmood ah gudahood. Anigu waxaan leeyahay sabab ay lixadan cisho ama laba bilood Meesha mataalo, wasaarada ayaana halkaa ka raadinaysa gab banana oo ay iyadu ka gasho, waxaa jira laba bilood oo ay shirkaduha soo xulayaan, sadex bilood oo madaxweynuhu uu haysanayo waana 7doba bilood sabab ay u qaadataa ma jirtee waa in 15. 15.15 oo 45cisho laga dhigaa intaasna waa in aanay ka badan.

**Qodobka 7aad farqadiisa 1aad xarafkiisa X.** Haddiiuu yahay sarkaal dawladeed, xubin ka tirsan golayaasha sharci dejinta, xubin ka tirsan goleyaasha deegaanka, mas'uul ka tirsan Xisbi Siyaasadeed, marka laga reebo xubinta Guddida ee uu Wasiirku soo magacaabi doono. Sida aan halka hore ku soo saxnay waa in aanay golaha Xeer dajinta aanay cidi ka soo galin waana in halkaa la saxaa.

**Qodobka 8aad farqadiisa 2aad: -** Marka ugu horreysa ee xubnaha Guddida la magacaabayo ee la unkayo, hal xubin oo Guddida ah waxaa la magacaabayaa muddo laba (2) sanno ah, hal xubin muddo

saddex (3) sanno ah, hal xubin muddoafar (4) sanno ah, dhammaan xubnaha kalena waxaa la magacaabayaa muddo shan (5) sanno ah. Muddada shanta sannadood ah ee lagu sheegay Qodobka 8(1) waxa ay bilaabmaysaa marka ay dhammaato muddada xilka ee xubintii marka hore la beddelay. Madaxweynaha ayaa awood u leh muddo xilliyeedka uu xubnaha u magacaabaayo. Qodobkani waxaa uu ka hor imanayaa qodobka 15aad oo sheegaya in mudada xilka gudidu uu yahay 5sanadood waana in xubnaha kala qaadidooda laga daayaa ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 9aad farqadiisa 1aad xarafkiisa X.** Haddii ay caddaato in la helo xog ku saabsan xubinta, xogtaas oo noqon lahayd sabab ka reebta in xubinta loo magacaabo Komishanka haddii ciddii soo magacawday ay ogaan lahayd markii ay magacaabaysay, xubintaa markiiba waa laga saarayaa Komishanka xubinnimadana way waayaysaa. Farqadani ma cada xubinta waxa xilka lagaga qaadayaa waa in ay cadaataa oo wax tixraac leh waa in ay noqotaa.

**Qodobka 16aad farqadiisa 9aad: -** Qaybta somaliga ah iyo qaybta engriisiga ahi isma laha ee waa in la saxaa oo waxaa loo jeedaa walaalayn ee looma jeedo miday hadii ay inoo midoobaan dadka ayay dhacayaan ee waa in qodobkaa laga saaraa khaladka ku jira

**Qodobka 18aad farqadiisa 1aad** Komishanku waa in uu soo gudbiyaa Xeer-hoosaadka Tacriifadda si ay u ansixiso Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu. Hadii qiimaha la gooyo waxaa Meesha ka baxaya tartankii xorta ahaa, oo qofna ma doonan karo tii u jabnayd, oo hadii aan tusaale u soo qaato waxaa ka mid ah shirkadaha isgaadhsiinta oo aan aragteen maanta Meesha uumarayo oo aan tartan ku galnay qodobkaa farqadiisaa sidaa ha loo soxo ***(taagro 7mudane ah ayuu helay).***

**Qodobka 31aad Farqadiisa 1aad** Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Komishanka, waxa awood ay u leedahay in ay soo saarto Xeer-hoosaad si ay u fuliso Qodobbada Xeerkan. Waar hadii xeer-hoosaad uu komishanku samaystay muxuu yahay xeer-hoosaadka kale ee ay wasaaradu soo saaraysaa? Qodobkaa waa in qabi ahaantiisaba Meesha laga saaraa. ***(Taageero 9mudane ah ayuu helay qodobkani)***

Gudoomiye aniga oo intaa ku soo gabogabaynaya marka aan xeer ka doodno xeerkuna uu mino badan xambaarsanyahay ha odhanina xog-haynta ha isku soo gurtee waxaad u dhiibtaan nimanka looyarada ah ee aad lacagta siisaan hana isku soo gureen, marka aan taa awooda saarno qualityga xeerka ayay qayb ka noqonaysaa oo waxyaabo yar yar oo madmadaw ah hadii ay xeerka ku jiraan waa lagu saxayaa, markaa inta aan gudiyo u diri lahayn ama aan dib u celin lahan waa in ninmankaa sharci yaqaanada aan adeegsano waad mahadsantihiin.

**Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool):-** shirgudoonka iyo mudanayashaba waan salamayaa, waxaan taageerayaa soo jeedintii uu soo jeediyay xildhibaan sanweyne ee ahay marka xeerku uu golaha soo gaadha lagana doodanyo gudi ha loo saaro waxaan ku raacsanahay in la yareeyo intii la yarayn karo.

Marlabaad waxaan taageerayaa soo jeedinta gudida aniga oo tix galinaya hawshii balaadhnayd ee ay mudaba gacanta ku hayeen habka ay u soo dhigeen, marka laga reebo qodobka lixaad oo sheegay in gudida loo daayo sidii xeerkii hore ee wasaaradu inoo keentay sida uu cadaynayay, waayo waxaa

wanaagsanayd meelaha ay ka soo doorteen waxaana ku wanaagsanaa sidii hore ee uu sheegayay xeerku, marka qodobkaa laga saaro inta kale sideeda ayaan ku taageerayaa soo jeedinta gudidda.

**Qodobka 4aad** oo ka hadlaya awooda wasaarada, marka la isku eego habka komishanka loo sameeyay iyo habka wasaaradu awoodeeda u samaysatay waxaad moodaa in ay yihii la hab oo aan la cabiri karayn, tusaale ahaan **Qodobka 4aad farqadiisa 4aad iyo 15aad** labaduba waxay cadaynayaan komishanku in aanu xor u ahayn hadii ay noqoto xeer-hoosaadka iyo haday xaga shaqadaba tahay, markaa waxaan leeyahay qodobkaa wixii khilaaf ah ee shaqada komishanka ka hor imanayaa waa in Meesha laga saaraa oo gabi ahaanba dib loogu noqdaa***. (Taageero 3 mudane ah ayuu helay)***

**Qodobka 16aad farqadiisa 9aad** waxay ka hadlaysaa midaynta, midayntaa waxaan qabaa cilado badan ayay keentaa hadii aanay dadku midayn maasiix ah u dooran, waana in luuqad ka fudud la adeegsadaa oo la yidhaa is waafajin.

**Qodobka 18aad** oo ka hadlaya takaaliifta, waxaan qabaa in hadii la yidhaa ta kaaliif ha la sameeyo in aanay suuro gal ahayn, fikirkii ayaa lagu kala duwan yahay oo suuqii ayaa lagu kala duwan yahay, waayo waxaan is qabanayn in aan takaaliif jidayni iyo in aan ka hadalno suuq xora waa waxaan is qabanayn, waana in laga daaya takaaliifta.

Qodobka aadka xildhibaanadu uga hadleen ayaan ka hadlayaa ee ah saacadaha saacaduhu cilo ayay leeyihiin dadkana cilo ayay ku leeyihiin, shirkadahana cilo ayay ku leeyihiin oo shirkaduhu waxay dadka ku qasbaan mid iyadu ay leeyihiin ama mid iyagu ay danaynayaan, waana in xeerka lagu daraa in shirkadaha laydhku ayna ku khasbin dadka saacad aya danaynayaan. ***(Taageero 4 mudane ayuu helay).***

**Md. Abokor Cabdiraxmaan Good: -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa, marka hore waxaan taageersanahay lifaaqa gudidu xeerkan soo raacisay mudo badana ay gacanta ku hayeen, marka laga reebo qodobka gudida.

**Qodobka 9aad xarafka b** ee midaynta hadii shirkada xoog lagu midaynayo waxaan leeyahay waxba ma jiraan, waa in halkaa la yidhaa hadii ay shirkaduhu midoobayaan waa in la yidhaa waa in ay iyagu xor u noqdaan iyaga ayayna u taala.

**Qodobka 18aad** ee komishanka awooda u siinaya in ay iyagu tacriifada gooyaan, waxaan leeyahay ma joogno wakhti wax la gooyo waana qodob ka hor imanaya dastuurkeena waana in laga saaraa qodobkaa dhaantiiba ayaan soo jedinayaa.

Qodobada badan ee dhinacna awooda siinaya komishanka dhana wasaarada waa in dhamaantoodba Meesha laga saaro waayo waxay komishanka ka dhigayaan mid hoos imanaya waasarada ee waa in laga saaraa dhamaantood, waana in komishanka shaqadiisa loo magacaabay loo daayo ***(taageero 3mudane ah ayu helay).***

Waxaa kale oo jira qodobada odhanaya wasaaradu iyada ayaa heshiisyada laga galaysa meelaha laydhka laga keenayo hadi ay noqoto jaararka iyo laydhadhka jaban waxaan leeyahay in loo daayo shirkadaha oo ay wasaaradu approval ka siisaa kaliya intaa ayaan ku soo koobayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi: -** waan idinsalamayaa, Gudoomiyaha, shigudoonka, marwaada, marwooyinka, xildhibaanada, shaqaalahaba waan salamayaa, saxaafada, inta idhaysan doonta, inta I akhriyi doonta, dhamaantiin waan idin salamayaa.

Kow waxaan xog-haynta ka codsanayaa marbaa qodobada qaar la ilaawaaye, shakhsiyan waxaan marka hore taageerayaa qobadii uu soo jeediyay xildhibaan Cabdiraxmaan dheere, eray ahaan iyo qodobo ahaanba oo faahfaahin dheeraada ka bixiyay qodob aniga laftaydu halkan aan ku soo qoray.

Waxaan rabaa in la ii record-gareeyo iyo cidii igu taageersan in qodobadaa sidoo loo qaatana in ay igu taageeraan ***(taageero ilaa dhawr iyo toban mudane ah ayuu helay).***
***Gudoomiye Baashe: -*** *Xildhibaan siciid doodaa toos u gal.*

**Md. Siciid: -** Gudoomiye waa doodaydii baaban galay, waa doodaydii, gudoomiye adoo iga raaliya laba wax ayaan is dul taagayaa: -

- **Suuqa xorta ah**: -
  Suuqa xorta ahi waa mabaadiida asaasaasiga ah ee dastuurka waana qodob dastuuri ah, suuqa xorta ahna ama buug ka akhri ama ahaw qof ganacsi iyo aqoon iyo khibrad ganacsi soo maray laba wax ayaa asaas u aha, labadaa waxna waa in ay jiraan, adeegayaal badan oo ku jira adeegani, oo masalan shir kado kala duwani waa in ay jiraan, oo aan monopoly jirin oo aan hal shirkad la noqon, waana in ay kala duwan yihiin dadka wax kaa iibsanayaa una furan tahay in ay shirkado kale soo gali karaan.

- **Sixirku, Tacriifad, pricing** ku waa in uu ahaado wax xor ah oo furan laguna tartamo.

Waxaad moodaa in xeerkani uu dhawr meelood kaga hadlayo oo uu soo koobo oo mabaadiidiisii asaasiga ahayd Meesha laga saaro, midi tusaale ahaan waa taa ku saabsan qodobka midaynta ah ee ah **Qodobka 16aad xubintiisa 9aad** Cabdiraxmaan iyo rag faro badan oo kalana ay ka hadleen. Eraygaa midaynta ahi waxaa uu gabi ahaanba ka soo hor jeedaa mabaadiida suuqa xorta ah in Meesha laga saaro.
Midina waa ta ku saabsan tacriifada ee **Qodobka 18aad,** bal hada mid u fiirsada ee aad qodobkaa 18aad aad dhex gasho xarfaha uu ka kooban yahay, waxaad helaysaa tacriifada marka la samaynayo in ay farsamo ahaan ka hadlayaan in la eegayo kharashyada ay galaan shirkaduhu, shirkadaha aynu nidhi shirkado badan oo kala duwan ayay noqonayaan, adinkuba qiyaasa oo shirkad shirkad kala la kharash noqonaysaa ma jirto, waayo kharashku waxa uu ku xidhan yahay baaxada ay shirkadu leedahay inta meelood ee ay ka shaqayso, waxay ku xidhan tahay qalabka ay ku shaqaynayso, waxay ku xidhan tahay mishiinada, xataa shirkadaha ayaa kala quality sareeya, mushaharada ay shaqaalohooda siiyaan.

Markaa farsamo ahaan ayaad fahmaysaa sida uu qodobkaasi u qaldan yahay, maadaama waxan uu qiimaynayaa aanu shirkadaha kharashku aanu iskugu wado mid ahayn, sidoo kalana sixir go'ayntu ay ka soo hor jeedo mabaadii'da asaasiga ah ee suuqa xorta ah.

**Sidaa darteed anigu waxaan soo jeedinayaa: -** iyada oo ay ku jiraan qodobadaa hore ee aan tix raacay ee aan idhi ha la ila qaato: -

- ✓ **Qodobka 4aad** in gabi ahaanba dib loogu noqdo qodobkaa oo ka hadlaya awoodaha komishanka iyo waasaarada.
- ✓ **Qodobka 16aad** ee ka hadlaya midaynta in isna wax laga badalo
- ✓ **Qodobka 18aad** ee tacriifada ka hadlayana in dib loogu noqdo oo dib loogu soo celiyo suuqii xorta ahaa. (***Taagro ayay heleen qodobadani)***

Waxaan ku soo gunaanadayaa oo aan soo jeedinayaa in la ansixiyo xeerka iyada oo lagu darayo soo jeedinta Gudidda iyo **Qodobada 4aad, 5aad,16aad, iyo 18aad** oo la waafajinayo suuqa xorta ah, intaa marka la dhamays tiro waxaan soo jeedinayaa in xeerka la ansixiyo wanan ka baxay. ***(taageero ayay heleen qodobadani).***

**Md. Axmed Maxamd Diiriye (Nac-nac): -** shirgudoonak sharafta badan leh, iyo xildhibaanada waad salaamantihiin hadalka intii sii badnayd waxaa dhameeyay xidhibaanadii iga horeeyay oo intii xaqa ahayd ka sheekeeyay, igu horayn waxaan waafaqsanahay lifaaqii ay soo jeediyeen gudidu, waxaa kale oo aan soo jedinayaa in tijaaradu ay noqoto tijaarad xor oo xalaal ah oo qof waliba uu nasiibkiisa galo ayaan leeyahay.

Bari ayaynu qaldanay oo aynu kaybalka ugu xidhnay monopoly, ee waa in aan taa ka foojignaana, shirkadaha waaweynina waa in ay masuuliyadooda qaadan waxii khasaare ah ee ka yimaadsa shirkadohooda, sidoo kale waxaan aad u taageersanahay in komisha madax banaan loo sameeyo oo wasaarada ka madax banaan waa in loo sameeyaa waana xaq, waana in shirkadaha loo qaybiyaa si siman, waana in si siman cashuurada looga qadaa intaa ayaan ku soo gabogabaynayaa.

**Md. Prof. Maxamed Cumar Adan (Jiir):-** bismilaahi Raxmaani raxiim, horta aniga shalay ayaa la ii dhiibay bahalkan balaadhan inta aan ka gaadhay ilaa xalay ayaa akhriyay, sida uu constitution keenu sheega in aan qaadaynay free market ayaad hadana moodaa in waxbadani isku qaldanyihiin, meelo badana waxaad moodaa in ay dawladu ku jirto, haba ku jirtee waxay xaq u leedahay iyada ayaa dadka matashee in maamusho, markaa in generally waa in aan labada kala saarnaa ilayn waxaan ilaalinaynaa constitution ka e ayaa Meesha ku jirta.

Waxaa kale oo aynu ognahay in umahada wixii private sector ku awooda badan yeeshaa ee in aanay dawladu minimum intervention ku samaysaa in ay horumar keenaan oo iyaga dhexdooda uu tartan ka dhaco.

Waxaad arkaysaa in shirkadaha isgaadhsiintu ay africada in badan ka jaban yihiin oo maalinba maalinta ka danbaysa quality goodu soo hagaagayo waayo tartana wuu ka jiraa.

Lakiin waxaa jira hadii ay dawladu is leedahay waxyaaba qaad waad maamuli karaysaa waa muhiim, laakiin hadana waa in ay waxyaabaha qaar ilaalisaa ay ka midka yihii consumer interest oo tusaale ahaan laydhadhkan meel walba laga taagay iyo biraha wax ka qabataa waa muhiim ayna ku ilaaliyaan xaaladaha ay marka hore ruqsadaha ku bixinayaan.

Waxaa la odhan kaaraa waa isku day wanaagsan, hadana marka dhinac kale laga eego private sector ku marka hore waxbay boobaan lakiin marka ay wax yeeshaan waxbaa laga faa'iidaa horumarna way keenaan, waana cida kaliya ee wadanka wax ku celisa oo ay waxtarka umada ka shaqeeyan dhanwalba ha noqotee.

Waxaan odhan lahaa waxaa Meesha ka baxaya tartankii iyo horumarkii ee waa in ay dawladu ilaalisaa oo hayday caynaanka goostaan taa iyada lafteedu waa mushkilad.

Hadii aan eegno qodobada ay qoladeenani inoo soo qortay waxaad arkaysaa tusaale ahaa halka ay dawladu iyadu ka bixinayso fun-ka, dadka private ku lacagta ha bixiso ee lacagtaa iyadu meel kala ha galiso. Laakiin marka ay crises ay dhacaan waa in ay dawladu caawisaa hayday karayso weeyaan, ilayn cashuur ayay ka qaadaaye.

Qodobka aan qoonsaday waxaa uu yahay hadii meel la isugu keeno qiimahu waxa uu noqonayaa ka ay igay goyaan, quality giina ha gaagi maayo oo kolba waxay doonaan ayay keenayaan, waxaan kale oo aan qabaa in Meesha ay jiraan tartan xor oo anay meeshu cidna u xidhnaanin, waana in quality-ga iyo qiimahooduba ay noqdaan wax ay wax ka socdaan.
Ugu danbaynti waxaan soo jeedinayaa labadu ayayna iska keen qaldamin oo waa in uu noqdaa private oo tartarka iyo quality-gooda wanaagsanaadaa ama waa in uu nqodaa gobermentan ay dawladu iyadu wixii gacanta ku haysaa oo kharashka iyo hantidaba ay haysaa intaa ayaan ku darayaa.

**Md. Cabdiqaadir Jibriil Tukaale: -** shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa barnaamijka si weyn ayaa looga dooda si wanaagsana waa loo soo bandhigay, waxaan aad u taageerayaa qodobadii uu ka hadlay cabdiraxmaan dheere iyo Siciid Maxamed Cilmi, kaliya waxaan ku kabayaa in shirkadahan xidhiid kooda iyo Partnership sharcri.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa **qodobkaa 4aad** ee awoodaha wasaarada ee awoodii komishanka dusha ka saran in laga baraxo oo uu komishanku uu noqdo mid madax banaan.

Sidoo kale qodobadaa dastuurka ka hor imanaya ee ay ka mid ka yihiin midaynta oo kale, oo waxaa dusha la iska saarayaa dad aan isqaadi karayn taasi waa wax aan dhacayn **qodobka 16aad Farqadiisa 9^aad^** waxaanan soo jeedinayaa in aanay midoobin dhamaan teed oo wixii is raaci karayaa is raacaan waayo hadii kale dadka ayay dhacayaan.

**Qodobka 18^aad^** waxaa uu ka hor imanayaa dastuurka waayo qiime dajintana dastuurka ayaa uu ka hor imanayaa, waana in qadobkaa Meesha laga saraa, waana in uu xeerkani uu maraa draf 1 draf 2 iyo draf 3 oo kala danbeeyay si xeerka si wanaagsan looga shaqeeyo sidaa maantaba loo lafo guray ayay wanaagsanayd waana in si wanaagsan looga shaqeeyo waad mahadsantihiin

**Gudoomiye baashe** doodii waa la isku soo gurayaa xeerka waxaana loo codayn doonaa maalinta sabtida xildhibaanadu ha soo diyaar garoobaan fadhiguna wuu xidhan yahay.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| --- | --- |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| **-------------------------------------------------** | **-----------------------------------------** |